Istaraatajiyadda La Tacaalidda Cudurka Koroona Ee Maamulka Gobolka Banaadir.

HANNAANKA FALCELINEED EE MAAMULKA GOBOLKA BANAADIR U DIYAARIYAY CUDURKA KOROONA

Maamulka Gobolku wuxuu asaasay Guddi-hawleedda COVID-19 wuxuuna dejiyay naqshad kor loogu qaadayo maaraynta caafimaadka guud, diyaargarawga iyo ka-jawaabidda fayraska. Qayb yar oo dadweynaha ka mid ah ayaa fursad u heli doonta wixii dawo ah ee lagual tacaalayo Koroonaha, sida ay u eg tahayna diyaar maaha wax neef-caawiyayaal ah iyo hawlwadeenno caafimaad oo xaaladaha daran takhasus u lehba. Taasi waxay ka dhigan tahay in guddi-hawleedda mudnaanteedu noqonayso intii suuragal ah cudurka in laga hortago si loo xaddido dhimashada iyo qaadista. Tani xoogay waqti ah bay inoo marxinaysaa, waxaanay hoos u dhigaysaa khasaaraha dhaqaale iyo kan nafeed ilaa laga hirgelinayo qorshe samatabax oo laga dheegayo halbeegyada ka hortagga cudurrada faafa.

Istaraatajiyadda Maamulka Gobolka waxa ka mid ah tixgelin la siinayo siyaabaha qaybaha bulsho ee nuguli ay fiditaanka cudurka xaabo ugu noqon karaan haddii aan si hagaagsna loo tixgelin. Dadka gudaha dalka ku barakacay waa qayb bulsho oo nugul, duruufaha keena ee saameeya nuglaanshahooduna way ka sii darayaan.

Falcelinta Koroonaha ee Maamulka Gobolku waxay socotaa siyaasadaha gobolka hore uga sii jiray, sida Qorshaha Istaraatajiyadeed ee Maamulka Gobolka iyo Istaraatajiyadda Xalalka Waara kuwaas oo suntaya tiirarka udub-dhexaadka u ah xallinta arrinta barakaca, alhuumadan dhacdayna waxayba sii waajibinaysaa in maamulka gobolku dejiyo hadafyo muddada fog ah oo lagu yaraynayo barakaca iyo nuglaanshaha dhiillada caafimaadka guud. Istaraatajiyadda Xalalka Waara ee Maamulka Gobolku waxay hagid cad ka bixinaysaa sida dowladda hoose u qaabbilayso arrinta barakaca ee gobolka waxayna jawaab ka bixinaysaa dhiillada caalamiga ah ee Koroonaha iyadoo u maraysa shanteeda tiir: Guryaynta iyo Dhulka, Helitaanka Adeegyada Asaasiga ah, Maamulka, Noolaanshiyaha, iyo Cawilnaqa (Returns). Markan waxaynu eegi karnaa afarta ugu horreeya si aynu u dabbaqno falcelinta Koroonaha, tixgelinna u siinno sida istaraatajiyaddu ula jaanqaadi karto siyaabaha cudurka lagaga hortago.

Muqdisho waxa muhiimad weyn u leh hab lakabyo badan oo lagaga falcelinayo laguna xaddidayo Koroonaha. Iyadoo sida ugu habboon looga faa'idaysanayo khayraadka ku diyaarka ah iskuxirka gargaarka bini-aadamnimo iyo midka horumarineed, waxay qayb lexaad leh ka tahay in bulshada laga badbaadiyo cawaaqibta dhaqaale iyo kuwa cudurba.

I. Hirgelinta Xarunta Hawlgalka Degdegga ah – Guddi-hawleedda COVID-19 ee Maamulka Gobolka

Si loo wajaho halisaha ku lammaan xogta iyo isku-xirnaanta, Guddi-hawleedda Maamulka Gobolku waxay dejisay Xarunta Hawlgalka Degdegga ah, oo shaqadeedu noqonayso:

1. Xaqiijinta xog sugan oo laga helo:
    a. Tirakoobka faafidda, tira-qabashada xaaladaha (caseloads), xaddiga dhimashada.
    b. Tirakoobyada tas'hiilaadka daryeelka caafimaad.
2. Xaqiijinta diyaarinta iyo dhaqangelinta olole wacyigelineed oo sugan.
3. Xaqiijinta diyaarinta iyo dhaqangelinta istaraatajiyad isgaarsiineed oo sugan oo Maamulka Gobolku hirgeliyo
4. Diyaarinta tas'hiilaad wadashaqayneed oo lala yeesho waaxaha gaarka loo leeyahay, bulshada rayidka ah, iyo beesha caalamka ee u taagan tallaabooyin khaas ah oo falcelineed.
5. Xaqiijinta isku-xirnaan sugan oo dhex marta qaybaha kala duwan (dowladda, waaxda gaarka ah, bulsahda rayidka ah, beesha caalamka ee u taagan tallaabooyin khaas ah oo falcelineed) si looga baaqsado in hawl keli ah labo goor la qabto, labo jeer hal wax la maalgashado iyadoon la isu warhayn, farriimo soo noqnoqda ama iska hor imanaya la diro, iyo in la cariyo intii waxtarnimo iyo waxgalnimo lagu gaari karo iyadoo khayraadka xaddidan laga faa'idaysanayo intii suuragal ah.

Xaruntu waxay dhextaal isku xira u noqonaysaa dhammaan dhinacyada danaynaya wadashaqaynta sidii loo xaddidi lahaa ee loo maarayn lahaa dhiilladan.

Si ay qaab hagaagsan ugu shaqayso, Xaruntu waxay aad ugu baahan tahay shaqaalayn iyo qalabayn. Gaar ahaan, baahiyuhu waxay kala yihiin:

1. Baahida tirakoobka: Labo (2) tirakoobyahan, afar (4) madaxtiris-qaade (enumerator), iyo khabiir yaqaan nidaamka xogta meelaynta dhuleed (GIS)
2. Kooxo falcelineed: oo ka kooban takhasusley la soo ansixiyay, oo agaasinka sare ee Maamulka Gobolka kala talin doona khataraha iyo halbeegyada ay tahay in la qaato, gaar ahaan saddexda (3) bilood ee soo socda, ee aagaggan:

    a. Maaraynta isgaarsiineed. Khabiir isgaarsiineed oo Telefishan iyo raadyaw, labo (2) khabiir oo u gaar ah baraha bulshada—diiraddana saaraya wacyigelinta iyo awoodaha la xiriira ee wacyigelin lagu samaynayo.
    b. Maaraynta kharataha caafimaadka guud
    c. Khabiir ku shuqul leh maaraynta masiibooyinka.
    d. Maaraynta khataraha dhaqaale.
    e. Maaraynta khataraha bulsheed.
    f. Qof bartay cudurradu siday u faafaan loona xakameeyo (Epidemiologist)
    g. Khabiir ku takhasusay cudurrada faafa

Shaqooyinka u yaal Xaruntu waxay noqon doonaan:

- Isku-xirka, qorshaynta iyo kormeeridda heer gobol: u ololaynta in qorshaha lagu soo daro qaybaha bulshada ee barakacayaasha iyo saboolka magaalada ku nool ah, oo ay soo hoosgelayso xisaabinta baahiyaha adeegyada caafimaadka, iyo Biyaha, Nadaafadda Iyo Fayadhawrka (WASH); isku-xirka kulannada oo ay qayb ka qaadato; qiimaynta kartida caafimaad ee ciddii wadashaqayn lala yeelanaba ay u leedahay falcelinta hadduu cudur ka dillaaco xeryo iyo degsiimo qaxoonti.

- Ilaalo faafineed (Epidemiological surveillance), kooxo falcelinta foodda ah qaabbilsan, iyo baarista xaaladda: wax ku darsashada ilaalada, raadinta xaaladaha ee aan joogtada ahayn, raadgurka xalaadda (contact tracing), iyo baaritaanka digniinaha soo dhaca iyadoo lala shaqaynayo Wasaaradda Caafimaadka, Hay'adda Caafimaadka Adduunka iyo saaxiibbada, oo ay soo hoosgelayaan goobaha gobolka laga soo galo iyo aagagga qaxootiga.

- Kormeeridda ilaalinta (Protection monitoring): diyaarinta habab iyadoo dowladda iyo saaxiibbada kalaba lala kaashanayo lagu kormeerayo lagagana soo warbixinayo, sidoo kalana lagu khafiifinayo khataraha ilaalineed ee suuragalka ka ah qaxootiga iyo baracakacayaasha, oo ay soo hoosgelayaan in la xayiro in dhulka la soo geli karo iyo xuquuqda magangelyo-dalbashada.

II. La socoshada sida dhabta ah ee uu Koroonuhu bulshada ugu fidiyo

Waxa muhiim ah in la kordhiyo kartida lagu xaqiijinayo macluumaad isku mid ah oo cusub si loo kabo Xarunta Hawlgalka Degdegga ah. Tani waxay u baahanaysaa xoojinta dabagalka cudurka, tijaabada baarista iyo nidaamka warbixineed. Waqti xaadirkan waxa Soomaaliya yaalla 4 shaybaar oo kala yaalla Muqdisho, Boosaaso, Hargeysa, iyo Garoowe. Intooduba waxay iminka awood u leeyihiin in ay cudurka baaraan, balse kan Nayroobi yaalla ayaa ugu horumarsan. Sidaas oo ay tahay, iyadoo ay Muqdisho taallo

ayaa tijaabada bayoolaji loo diraa Kiiniya oo lagu hagaajiyaa Machadka Deraasadaha Caafimaad ee Kiiniya iyo shaybaarrada kale ee mandiqadda ku yaalla si loogu sameeyo deraasayn iyo habayn dheeraad ah. Tani waxay si lexaad leh hoos ugu dhigaysaa awoodda Soomaaliya u leedahay in ay ku warbixiso xog waqtiga la socota oo ay si sax ah ula socoto faafidda uu cudurku bulshada ku dhex faafo.

Sidaa darteed, Maamulka Gobolka Banaadir wuxuu hirgeliyay nidaam ilaalo oo si elegtaroonig ah u warbixinaya oo lagu cabbirayo sida cudurku ku dhex yahay bulshada. Waa lanbar furinta hore ah oo dadka deegaanku soo wici karaa kuna soo gudbin karaan astaamahooda iyo xogta shakhsiga ah; dabadeed loogu sheegayo tallaabooyinka xiga haddii ay tahay kala-durkid, isbaarid, isqoqobid ama karantiil. Hasayeeshee, si Muqdisho looga xakameeyo dillaacidda cudurka, waa daruuri in la helo hab cudurka lagu baaro oo dalka laga heli karo.

Baahiyaha taageero ee degdegga ah:

1. In la soo waarido qalabka baarista: (iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Caafimaadka iyo Xafiiska Haayadda Caafimaadka Adduunka ee Soomaaliya)
2. Meelaynta xarumaha caafimaad ee gaarka loo leeyahay iyo kuwa dowladdaba ee maxalliga ah, iyo dejinta nidaam xog-gudbineed oo isla markiiba Xarunta Hawlgalka Degdegga ah u gudbinaya xaaladaha la baaray;
3. Dejinta nidaamyo elegtaroonig ah oo hor leh loona adeegsan karo bulshada si ay dadka astaamaha isku arkaa ay isu soo sheegi karaan macluumaad dheeri ahna u heli karaan si ay qaab bedqaba ugu helaan baarid iyadoo la xaddidayo heerka ay cid kale ugu daaran karaan.
4. Casriyaynta raadgurka xaaladaha iyo kormeeridda cidda ugu dhow ee xiriir la samaysa xaalado la xaqiijiyay
5. Xog kala dhigdhigan (Disaggregate data)

III. Hoosudhigidda iyo yaraynta gudbinta

Celcelis ahaan qofka sadhaysan ee qaba cudurka Koroona waxa ka qaadi karo 2-2.5 oo qof. Dabadeed kuwa fayrasku gaaraa waxay astaamaha ku yeelanayaan 14 cisho gudahood, 20% ka mid ahna xaaladdoodu way ka sii dari kartaa oo waxay yeelan karaan oof iyo neefmareenka oo hawlgaba, 5% ka mid ahina way u dhiman karaan. Sidaa darteed, hoosudhigidda iyo yaraynta gudbintu waa tallaabo lamahuraan u ah yaraynta xaddiga dhimashada. Sida kor lagu xusayba, nidaamka daryeelka caafimaadka ee Muqdisho wuxuu la ildaran yahay qalab la'aan, mana kaafin karo wax ka badan 20 bukaan oo xaalad adag ku sugan, ama in ka yar (4) haddii ay neef-caawiyayaal u baahdaan. In kastoo qalab caafimaad oo dheeraad ah oo la dalbado iyo dibuhabaynta cisbitaalladu ay kordhin karaan in dad hor leh lala tacaalo, haddana haddii aan la xakamayn in cudurku bulshada ku dhex dillaaco waxay taasi keeni kartaa in nidaamka daryeelka caafimaad uu ka dabbaalan kari waayo, taas oo keeni karta khasaare kordha.

Iyadoo taa la beegsanayo, waxay dowladdu xirtay soohdimaha iyo dugsiyada. Maamulka Gobolkuna wuxuu qorshaynayaa in uu baritaaro dedaalladaa isagoo si cad u bayaaminaya hagayaasha kala-durkidda iyo karantiilka ee xarumaha bulsho, ganacsi iyo kuwa diimeed. Waxa sidoo kale tan soo hoosgelaya in si cad loo kala saaro wixii loo tixgelinayo adeegsyo asaasi ah oo la oggol yahay, iyo hawlqabadyada muhiimka ah iyo kuwa aan ahayn. Tiro badan oo Soomaalida ahi waa xoogsato maalinle ah, in badna oo ka mid ah qaybaha bulsho ee nugulna waxay noloshoodu ku tiirsan tahay fursadaha guriga bannaankiisa ah. Taasina waxay daruuri ka dhigaysaa in lala socdo saamaynta ay bandawda suuragalka ah ee la dul dhigi karo hawlqabadyada qaar ay ku yeelan karto bedqabka dadka deegaanka.

Maamulka Gobolku wuxuu sidoo kale xiriir la sameeyay ganacsatada, bulshada rayidka iyo culimada si ay u wada shaqeeyaan una soo wada saaraan farriimo mid ah iyo dedaallo lagu xaqiiqjinayo in loo hoggaansamo halbeegyada kahortagga.

Baahiyaha taageero ee degdegga ah:

1. Qiimayn lagu sameeyo khasaaraha ka dhalan kara isusocodka la xaddido iyo munaasibadaha la xiro, iyo kaabayaasha, ganacsiyada iyo adeegyada aan daruuriga ahayn.
2. Samaynta ogaysiisyo bulsheed oo ku aaddan halbeegyada kala-durkidda, isqoqobidda iyo karantiilka.
3. Unkidda xarumo karantiilka iyo qoqobidda qaabbilsan
4. Xiriir lala sameeyo cidaha bixiya adeegyada asaasiga ah, sida biyaha iyo korontada, si ay u sii wadaan adeeg-bixintaa.
5. Xiriir lala sameeyo hoggaamiyayaasha bulshada, bulshada rayidka ah, ganacsatada iyo culimada si kor loogu qaado wadashaqayn waxtar leh, dadkana loogu dhiirrigeliyo in ay u hoggaansamaan halbeegyada kala-durkidda.
6. Shuruudo hagid ah oo loo dejiyo iyo xaddidaad rasmi ah oo lagu sameeyo isu-imaatinka bulsheed iyadoo la raacinayo hannaan anshaxmarin ah oo la marsiinayo ciddii u hoggaansami weyda.

IV. Diirad-saaridda dadka aadka ugu sii nugul

Cudurka Koroona wuxuu khatar daran ku yahay dadka da'da ah iyo dadka cudurrada kale ee difaaca wiiqaya la nool. Intaa waxa dheer qaybaha bulshada ee nugul ee cawaaqibxumo darani kaga iman karto haddii cudurku dillaaco iyo marka la dhaqangeliyo halbeegyada la-tacaalidda. Tusaale ahaan, dillaacyada caafimaadka guud ku dhashaa waxay raadayn sooc ah ku leeyihiin haweenka iyo hablaha. Kaalinta ay haweenka iyo habluhu ku dhex leeyihiin bulshada iyo guryaha Soomaaliyeed, siiba shaqada guriga, iyo in ay yihiin dadka ku jira furinta hore ee qaybaha caafimaadka iyo bulshada ayaa waxay kor u qaadayaan jaaniska ay Koroonaha ku qaadi karaan. Intaa waxa dheer, haweenka, hablaha iyo qaybaha kale ee nuguli waxay khatar dheeraad ah ugu jiraan in loo geysto xadgudubyada jinsiga ku salaysan marka cudur guud dillaaco, oo ay ugu wacan tahay in ay xaddidan tahay fursadda ay u helaan in ay gaaraan ama helaan adeegyada, iyo caqabadaha daran ee go'aan-gaarayaasha ka haysata in ay ka soo dhalaalaan shebakadda bulsheed ee loo baahan yahay.

Dhanka kale, dadweynaha Soomaaliya aqbalabiyaddoodu waa Muslimiin. Wadaaddadana qaranka waa laga dhex qaddariyaa. Sidaa darteed, waxay muhiim u noqonayaan in ay bulshada lagu faafiyo xog sax ah oo cudurka ku saabsan.

Baahiyaha taageero ee degdegga ah:

1. Samaynta koox ay ka go'an tahay si loo maareeyo xadgudubyada guryaha ka dhex dhaca iyo kuwa jinsiga ku salaysan ee (sida la filayo) kordhi doona.
2. In la qorsheeyo sidii loo ilaalin lahaa amniga iyo bedqabka qaybaha bulshada ee halista dheerida ah ku sugan iyo kuwa aanu adeeg naf lihi gaarin
3. In la dejiyo liistada meesha ay joogaan qaybahaa bulsho ee halista u badan wajahaya iyo goobaha ay ku ururs an yihiin, sida: duqaytida, xabsiyada, xeryaha barakacayaasha gudaha, carruurta bilaa hoyga ah, iyo qaybaha kale ee la midka ah.
4. In xiriir lala sameeyo dhallinyarada iyo qaybaha nugul (sida carruurta bilaa hoyga ah, dadka lexaadkoodu kala dhiman yahay, iyo bulshada la haybsooco).
5. In la meeleeyo goobaha diimeed dabadeedna loo geeyo hagayaal, lana tago si loo xaqiijiyo in ay u hoggaansameen siyaasadaha kahortagga cudurka, iyo in la xaddido tirada iman karta goobahaa.

6. In la xaqiijiyo in culimadu hesho oo bulshadana u sii gudbiso xog farsamo iyo caafimaad oo sugan isla markaana cusub, si loo yareeyo xaddiga gudbidda.

V. Xoojinta iyo Ballaarinta Kartida Nidaamka Caafimaad si loo joogteeyo hawgallada caafimaad loogana baaqsado dhimasho badan

Wixii ku siman Maarso 29, 2020, Soomaaliya waxa laga diwaangeliyay saddex xaaladood, tiradaas oo marka loo eego xarumaha caafimaad ee haddeer diyaarka ah aan wax culays ah ku hayn nidaamka caafimaad. Hasayeeshee mar kasta oo tiradu sii badato oo ay barbar-socdaan dedaalladii faafidda lagu yaraynayay oo aan jirinba, waa mar kasta oo halis dheeri ahi soo wajahi doonto nidaamka caafimaad ee dalka, ugu danbayntana taasi keeni doonto culays aan laga dabbaalan karin. Sida laga dheehan karo xawaaraha ay jartay faafidda cudurku ee dalalka kale dhexdooda, Haguhu wuxuu si xooggan u soo jeedinayaa in dal kastaa uu kor u qaado diyaargarawgiisa iyo tabaabushihiisa isagoo filanaya in cudurku bulshada dhex qaado, siiba goobaha dadku ku badan yahay.

Jaantuska 2. – Heerarka iyo Marxaxladaha Ruqaansiga Dillaacu ku dhex ruqaansado bulshooyinka maxalliga ah

Wax xaalad ah la ma diwaangelin	•wax culays ahi ma saarna nidaamka caafimaad
Xaalado shakhsi ah oo koobkooban	•wax culays ahi ma saarna nidaamka caafimaad
Bilaabitaanka in cudurku bulshada dhex qaado	•Bilaabitaanka in culays fuulo nidaamka caafimaadka
Cudurka oo si baaxad sarraysa u dhex qaaday bulshada	•Culays dhexdhexaad ilaa darnaan ah oo fuula nidaamka caafimaad
Simidda Xarriiqa (flattening the curve)	•Culays fuula nidaamka caafimaad
Xakamaynta xaaladaha shakhsiga ah	•Culays yar oo fuula nidaamka caafimaad
Xakamaynta cadaadiska ah oo halkaa lagu sii hayo	•wax culays ahi ma saarna nidaamka caafimaad

TIXRAAC - COVID - 19 A Frontline Guide for Local Decision-Makers

Xoojinta iyo Ballaarinta kartida nidaamka caafimaad u leeyahay maaraynta bukaan aad u badan

Maamulka Gobolka Banaadir wuxuu lafagurayaa xogta hore ugu sii taallay goobaha maguuraanka ah ee bulshada sida xannaanooyinka iyo cisbitaallada ku yaalla goobaha xaalad adag geli kara. Maamulka Gobolku wuxuu labalaabi doonaa dedaallada uu ku taageerayo goobaha caafimaad ee maxalliga ah, xannaanooyinka, iyo cisbitaallada si looga diyaargaroobo fayrasku in uu bulshada ku dhex faafo—goobaha ay ku sugan yihiin tiro badan oo barakacayaal ah oo u nuglaan kara qaadista iyo faafinta Fayraska Koroonaha. Tani waxay u baahan tahay abaabulidda khabiirro caafimaad oo maxalli iyo caalamiba isugu jira (Soomaali iyo cid kalaba) si ay u gacan siiyaan hawlwadeennada hawlgelaya. Tallaabooyinka faragelineed ee xooggani waxay u baahan yihiin doonis siyasadeed oo xiriirsan madax ilaa mijo—oo ay soo hoos-gelayaan xarun tababbareed oo ay maamuli doonto taageeri doontana Waaxda Caafimaadka Arrimaha Bulshada ee Maamulka Gobolka, iyadoo ka garab shaqaynaysa hawlwadeennada caafimaad sida digtoorrada iyo kalkaaliyayaasha, iyo bahda caafimaadka ee kale ee aqoonta fiican u leh.

Intaa waxa dheer, maaddaama daabulaaddii iyo baahintii alaabaha, kuwa caafimaad iyo kuwii kalaba, uu hakad ku yimi, waa in la sameeyo saadaal daabbuleed (supply projections), waxsoosaarrada la kala

hormaysiiyaa, dedaalladana waa in la dul dhigaa in xaddi badan laga kaydiyo alaabaha, sida qalabka bedqabka shakhsiga ah ee hawlwadeennada caafimaad iyo isdirayaashu u baahanayaan.

Baahiyaha taageero ee degdegga ah:

1. Tirakoob la isku hallayn karo in lagu sameeyo kartida waqti xaadirkan
2. Xaqiijinta in kartida kaydgalka ah markii loo baahdo la soo kicin karo (sida digtoorrada iyo kalkaaliyayaasha hawlgabka ah, shakhsiyaadkii kale ee leh xirfad cafimaad ama mid la xiriirta, iyo xataa aqoonta daryeelka caafimaad ee xoogagga amniga iyo beesha caalamkaba).
3. Dib u habaynta 5 cisbitaal;
4. Samaynta agabyo isgaarsiineed oo la iskula xiriiro oo ay ka go'an tahay (sida barnaamijyada moobillada)
5. Xaqiijinta soo waaridida qalabka iyo agabka daruuriga ah
6. Sahaminta in walxaha daruuriga ah si maxalli ah lagu soo saaro (iyadoo laga duulayo in soowaaridida alaab suuqa caalamiga ka timaaddaa ay iminka caqabad socod la kulmayso)
7. In hawlwadeennada loo diyaariyo in tirada bukaanku aad u badan karto iyo kartidii iyo hababkii ay kula tacaali lahaayeen
8. Xaqiijinta in xilliga dillaaciddu jirto cid kastaa heli karto caawimaad caafimaad, mid nafeed iyo mid moraal-dhisid.
9. Samaynta iyo hirgelinta habraacyo loo dhigo xarumaha caafimaadka iyo dhaqancelinta si loo yareeyo halista faafidda cudurka hannaan falcelineedna loogu dhigo dadka laga yaabo in ay qaadaan.

Tallaabooyin ku salaysan nidaamka daryeelka caafimaad

Si loo sugo nidaamka daryeelka caafimaad loona waafaqo kartida looga baahan yahay si uu u maareeyo bukaan aad u tira badan, waxa loo baahan yahay in hawlwadeenno caafimaad oo nooc walba isugu jira la soo daabbulo. Isla markaana waa in hawlwadeennadaa caafimaad lala garab taagnaadaa ilaalin ku filan si loo xaqiijiyo in nidaamkaa caafimaad ee markiisii horaba dhitinayay ay galaaftaan khaladaad la sixi karayay. Si loo yareeyo fursadda hawlwadeennada caafimaad ee markoodii horaba iska yaraa aanay u xanuunsan ama u dhimanba, waa in la kordhiyaa dalbashada iyo baahinta qalabka bedqabka shakhsiga ah (PPE) ee bahda caafimaadka loogu talagalay iyadoo la raacinayo tababbar ku filan oo tilmaamaya sida loo adeegsado iyo marka laga dhammaysto sida la isaga tuuro. Intaa waxa dheer, tababbaridda hawlwadeennada caafimaad ee heer degmo oo la baro waxyaabaha xaaladaha iyo cudurka lagu aqoonsado iyo maarayntooda, sida guriga loogu xanaaneeyo xaaladaha fudfudud, calaamadinta goobaha heerka labaad ee loo wareejin karo iyadoo la raacayo hagayaasha Wasaaradda Caafimaadka iyo Hay'adda Caafimaadka Adduunka. Ugu danbayn, si loo kordhiyo suuragalnimada isqoqobidda, karantiilka iiyo kala-durkidda, waa in inta ugu badan la kordhiyo soowaaridida iyo baahinta hoy kumeelgaar ah, iyadoo lagu lifaaqayo sharraxaad ku saabsan ujeedkooda.

In kastoo ay adag tahay in laga gaarsiiyo hoy kulmeelgaar ah oo baaxad weyn, oo soowaaridida agabkii loo baahnaa bilaabiddiisuna ay adag tahay, hannaankani waa in uu ku bilawdaa hab heer dhexe ah hoyga kumeelgaarka ah ee muddada dhowina wuxuu u baahanayaa in la taago si xal kumeelgaar ah uu ugu noqdo hoosudhigidda in cudurku ku dhex faafo bulshada qaybaheeda halista ugu jira. Caalami ahaan, si aan culays dheeraad ah loo saarin nidaamka caafimaad, dadka aadka ugu sii nugul cudurkan waxa la wayddiistaa in ay guryahooda isku karantiilaan. Soomaaliya dhexdeeda se tani waxay halis dheeraad ah ku soo kordhinaysaa dadka kale ee guriga kula nool qofkaa, maaddaama aqalkii kastaa ay ku wada nool yihiin dad kala jiilal ah—khaasatan barakacayaasha gudaha—oo iskuraran ay ku nool yihiin iyo guryayn aan ku filnayn oo aad diiqad u ah. Barakacayaasha guduhu waxay khatar ugu sugan yihiin in qasab lagu raafo taas oo socod hor leh keenaysa iyo in aanu qofkii is qoqobi karin.

Intaa waxa dheer, inta uu bilawday dillaaca cudurka Koroona, oo masiibo aadamnimo oo daran ku riday magaalooyinkii horumaray ee caalamka, Maamulka Gobolka Banaadir wuxuu dhawaan bilaabayaa, isagoo u sii maraya Waaxda Xalalka Waara, tijaabinta barnaamij hoy-gelin ah (housing) oo loogu talagalay 80 qoys oo baracayaasha gudaha ka tirsan. Ujeedka ugu mudani waa in la dhiirrigeliyo adkaysiga oo lagu

dhex faafiyo bulsho sidaas u nugul, iyadoo la sugayo guryaynta iyo dhulka iyo helitaanka adeegyada asaasiga ah sida waxbarashada iyo caafimaadka, kuwaas oo bilaash lagu bixin doono. 80-ka qoys ee qaybta ka noqonaya barnaamijkan tijaabada ahi waxay bishii iska bixinayaan ijaar macquul ah oo ay jari karaan oo aan is bedbeddelayn, dabadeed dowladda hoose waxay ku kabaysaa helitaanka adeegyada asaasiga ah.

Baahiyaha taageero ee degdegga ah:

1. Keenista hoy kumeelgaar ah oo degdeg ah (agab hoy).
2. Dibuhabaynta qaabka iskuraranka ah ee ay u yaallaan xeryaha barakacayaasha guduhu.
3. Xaqiijinta in raafidda qasabka ah iyo midda sharciga ahba la hakiyo muddo saddex bilood ah.

Biyaha, Nadaafadda iyo Fayadhawrka

Guddi-hawleedda Maamulka Gobolka ee Koroonaha qaabbilsani waxay meelaynaysaa oo aqoonsanaysaa goobaha halista daaqaya ee biyayarida iyo nadaafad-xumadu ka jirto, siiba xeryaha barakacayaasha gudaha iyo meelaha aan sida basrisan loo degganayn ee magaalada oo dhan, iyadoo adeegsanaysa nidaamka xogsiinta dhuleed iyo Qorshaynta Magaalo. Halbeeggan kahortag wuxuu xaqiijinayaa in dowladda hoose iyo tan heer degmaba ay qorsheeyaan goobaha xasaasiga ah ee suuragalka ah, ayna ku dhaqaaqaan xaqiijinta in tas'hiilaadkii lamahuraanka ahaa la meelmariyay si loo yareeya dhiillo dhici lahayd.

Maamulka Gobolku wuxuu qorshaynayaa in uu gacan ka geysto in xarumo nadaafadeed oo dheeri ah laga hirgeliyo deegaamada barakacayaasha gudaha ee nugul oo gaaraya 10,639 oo qoys, isagoo ka duulaya kordhinta sidii loo heli lahaa biyo, nadaafad iyo fayadhawr hagaagsan oo lagula tacaalo faafidda fayraska. Qarashka kaalmuhuna (stations) waxay u dhexeeyaan $180-$300, oo ka gaar ah tas'hiilaadka biya-helidda. Maamulka Gobolku wuxuu sidoo kale qorshaynayaa in uu maalintiiba qoysaskaa gaarsiiyo 5 litir oo biyo ah. Hasayeeshee, Maamulku wuxuu qorshaynayaa dhisidda goobo biyo laga helo oo hor leh si loo kordhiyo helitaanka biyo nadiif ah oo la cabbi karo. Goobaha biya-qaybinta waxa lagaga hortegayaa isbuurashada iyo qiimatirka goobo biyoodkii hore u jiray, sida kaalmihii biyaha iyo qasabadihii. Intaa waxa dheer in Maamulka Gobolku in uu ganacsatada saabuunta soo saarta ee maxalliga ah kala shaqayn doono in la gato saabuun gudaha lagu suubbiyay oo dabadeed la qaybiyo, iyo in agab fayadhawr laga soo ururiyo suuqa maxalliga ah, iyo wixii la mid ah, si saabuun lagu faraxasho loo qaybiyo oo dadweynaha loo siiyo fursad ay u ku helaan loona xoojiyo sidii looga faa'idaysan lahaa iyadoo la gaarsiinayo goobaha bulshadu isugu timaaddo sida masjidyada iyo suuqyada iyo wixii la mid ah.

Baahiyaha taageero ee degdegga ah:

1. Xaqiijinta in si ku filan loo helo goobo lagu faraxasho iyo agabka caawiyanaya sida saabuun, weelal dhuun dhuuban, iyo baaldiyo daboolan oo qoysasku helaan, iyo goobo qashinqub oo ay helaan barakacayaasha gudaha iyo bulshada qaybteeda saboolka ah ee magaaladu.
2. In agabka fayadhawrka la gaarsiiyo magaalada, siiba xeryaha barakacayaasha gudaha iyo gooboha iskuraranka ah ee magaalada
3. Kordhinta wacyigelinta fayadhawrka gacmaha.

Waxa cudurka xooggiisa lala xiriiriyaa waayidda khayraad biyo iyo nadaafadeed oo ku filan. Sidaa darteed, waxa la fili karaa in cudurrada caanka ahi ku dhex faafaan oo khasaare ku geystaan haddii qaddiyadda biyaha, nadaafadda iyo fayadhawrka aan laga hadal oo la daboolin, Fayraska Koroona isagu wuuba ka sii xagjiraa. Maamulka Gobolka waxa ka go'an in uu gacan ka geysto hagaajinta xaaladda caafimaad ee bulshada isagoo xoojinaya ballaarinayana nidaamka caafimaad kartida uu u leeyahay in uu la tacaalo bukaan aad u badan, inta aanay baahidaasi sooba ifbixin.

VI. Kordhinta Isla-socodsiinta Khatarta iyo Xiriir-la-samaynta Bulshada

Maamulka Gobolku wuxuu maarayn doonaa khataraha uu aqoonsado ee xiriirka la leh wacyigelinta iyo awoodaha loo leeyahay in wacyigelin la sameeyo. Waa muhiim in la xaqiijiyo in inta goori goor tahay la dhaqaajiyo olole wacyigelineed oo aad u baaxad leh. Intaa waxa dheer in Maamulka Gobolku u baahan yahay in uu afhayeenno lagu kalsoon yahay u xilsaaro gudbinta “farriimo xaqiiqo ku salaysan oo muhiim ah oo bulshada ku wajahan” si loo yareeyo jaahwareerka.

Si cudur faafa looga hortago waxa loo baahanayaa bixinta khayraad (agabeed, maaliyadeed, iyo mid xogeed) si dadku ugu qaadan karaan tallaabooyinka loo baahan yahay in hoos loogu dhigo heerka cudurka, sida gacmadhiqista, iska ilaalinta in aad wejigaaga taabato (gaar ahaan afka, sanka iyo indhaha), jeermis-dilidda oogooyinka, in labo mitir loo jirsado qofka kale, in afka iyo sanka lagu daboolo cududdaada (oo aanad gacmahaaga ku daboolin) marka aad hindhisayso ama qufacayso, in intii suuragal ah laga durko dadka aadka u sii nugul, in si dhammaystiran loo qoqobo qofkii sadhooba iyo dadka uu la nool yahayba muddo 14 cisho ah marka astaamaha la arko. Halbeegyada kahortagga waa in lagu sheego af cad (sida “labo mitir isu jirsada” oo aan la oran “kala-durkid bulsheed sameeya”) oo af cad lagu faahfaahiyaa (sida “labo mitir isu jirsada, waayo marka aad hadasho ama neefsato, duulduulka afkaaga ayaa gaari kara afka, sanka ama indhaha dadka labadaa mitir kaaga soo dhow”).

Waxa la isla meeldhigay dedaal lagu bilaabayo kordhinta wacyigelinta ku aaddan Fayraska Koroona iyadoo saamileyda ay arrintani khusayso iska kaashanayso, sida dowladda iyo bahda caafimaadka. Dedaalkaa waxa ka mid ah in carin iyo dedaallo wacyigelineed la baahiyo, sida in tabbeelooyin iyo boorar la dhejiyo oo biyo lacag la’aan ah iyo meelo lagu faraxasho la diyaariyo si loo xaqiijiyo in bulshadu ku baraarugto, iyo kaaga sii daran e in ay hesho agabkii ay isku badbaadin lahayd.

Maamulka magaalada oo dhex marsiinaya Guddi-hawleedda Koroonuhu wuxuu qaadayaa tallaabooyinka u muhiimka ah kor-u-qaadidda wacyigelinta isagoo ogaysiisyo muuqanaya ku dhejinaya isgoysyada muhiimka ah, oo uu ka mid yahay nal is bedbeddelaya oo lagu dhejiyay isgoyska mashquulka badan ee Lanbar 4, si ay u arkaan dadka baabuurta wata iyo kuwa lugaynaya aaggaasiba, waxaana ku xigaya tabbeelayaal iyo boorar lagu baahiyo magaalada oo dhan oo aan keliya lagu ekaysiin bartamaha. Calaamadahaa iyo tabbeelooyinkaasi waxay qayb ka yihiin dedaallo dadweynaha lagu barayo Fayraska Koroona iyo tallaabooyinka lamahuraanka u ah si ay u badbaadaan. Dowladda hoose waxay isu dirtay in ay daabacdo 4,000 oo buugyare oo lagu faafinayo xarumaha caafimaad ee magaalada iyo goobaha kale ee bulshada muhiimka u ah, oo ay ka mid yihiin xafiisyada dowladda hoose, iyadoo uga dan leh in la sii kordhiyo wacyigelinta.

Waqti xaadirkan Guddi-hawleedda Koroonaha ee Maamulka Gobolku waxay horseedday barnaamij saddex-geesood ah oo looga dan leeyahay wacyigelin guud oo kahortagga khusaysa, oo ay soo hoos-gelayaan in toos loola shaqeeyo mihnadlayaasha caafimaadka iyo bulshada. Qodobbada muhiimka u ah Guddi-hawleedda waxa ka mid ah in toos loola shaqeeyo goobaha bulsho ee gudaha, sida masjidyada, si goobahooda weysa-qaadashada looga faa’idaysto ujeeddooyin nadaafadeed oo heer bulsho ah.

Sidoo kale, wuxuu toos ugu baaqayaa ganacsatada gaarka ah in ay ka qayb qaataan in si wadar ah looga hortago faafidda Fayraska Koroonaha, waxaana tan soo hoos-gelaysa in ganacsatada saabuunta samaysa la wayddiisto in ay saabuun bilaash ah ugu deeqaan goobaha gacmadhiqista ee hadda jira. Sidoo kale, Guddi-hawleeddu waxay codsatay kulan lala yeesho shirkadaha biyaha si loo xaqiijiyo wadashaqayn iyo diyaarinta khayraadka biyo ee daruuriga ah. Magaalo adeegga biyaha siduu u dhan yahay gaar loo leeyahay waxa lamahuraan ka ah in xiriir la sameeyo, siiba loo sameeyo goobaha baracakayaasha iyo saboolka magaalada kuwaas oo sida ugu xun uu u saamayn doono haddii qiimaha biyuhu kordho ama helitaankoodu adkaado.

Samaynta goob aqooneed lagula dagaallamo warxumatashiilka, oo dedaallada la isugu geeyo oo ilaa heer degmo ahi waxay muhiim u tahay maaraynta faafidda Koroonaha. Waxa Muqdisho ka jira been laga aaminay Fayraska Koroona, oo ay badanka ugu wacan tahay in aanay bulshadu xogta toos uga helin

maamulka ama mihnadlayaasha caafimaadka. Si loo maareeyo warxumatashiilka ku gedaaman Koroonaha, Maamulka Gobolku wuxuu shirkadaha isgaarsiinta ka helay taageero ah in ay farriimo gaagaaban oo joogto ah ay bulshada ku xasuusiyaan xaaladda, si looga hortago in bulshadu xog la'aan dhacdo. Waxa sida guud la arkay in barakacayaasha guduhu ay badiyaa dhegaystaan ama heli karaan wararka raadyawga, Guddi-hawleedduna taas waxay uga faa'idaysatay in halkaa loo sii dhex mariyo xogta lagu badbaadinayo.

Hawlaha maaraynta khatarta wacyigelinta waxa ka mid ah:

1. Isla-socodsiinta khatarta iyo xiriir-la-samaynta bulshada: xoojinta gaarsiinta barakacayaasha iyo saboolka magaalada xog ku saabsan halbeegyada fayadhawrka, iyadoo loo marayo barnaamijyada tacliimeed ee heer qaran iyo heer bulsho iyo adeejinta agabyada isgaarsiinta.

2. Dejinta farriimo lagu gudbiyo madalaha kala duwan (boorarka, raadyawga, telefishanka, baraha bulshada) iyo iyadoo la beegsanayo dadweyne kala geddisan.

3. Dejinta ololayaal wacyigelineed oo khuseeya qaybo xirfadeed oo gaar ah.

4. Labo khabiir oo gaari kara hoggaamiyayaal bulsheed kala duwan (sida culimada, siyaasiyiinta, hoggaamiyayaasha bulsheed, ganacsatada, iwm).

5. Labo khabiir oo gaari kara bulshooyin gaar ah, sida barakacayaasha gudaha.

6. Labo khabiir oo ka shaqeeya la-dagaallanka warxumatashiilka (tusaale ahaan, iyadoo baraha bulshada la isticmaalayo).

7. Xaqiijinta in dadweynaha la beegsanayaa ay helaan hababka daruuriga u ah in ay qaataan wacyigelinta khatarta, iyo in wacyigelinta lagu dabbaqo gaarsiinta hababkaa. Qaybta soo socota ka fiiri faahfaahin intaa ka badan.

VII. Yaraynta Cawaaqibta dhaqaale iyo midda bulsheed ee ka dhalan karta safmareenka Koroonaha

Maamulka Gobolku wuxuu taageero u raadinayaa xirmada maaliyadda dowladda hoose si adeegyadii asaasiga ahaa ee dowladda hoose halkoodii uga sii socdaan. Maamulka Gobolku wuxuu ka kooban yahay qiyaastii 2,600 oo shaqaale, kamana baaqsanayo saamaynta dhaqaale ee cudurkaa oo bulshada ku dhex dillaacaa keeni karo. Waxa la qiyaasayaa in 50% miisaaniyad hawleeddii dowladda hoose uu dhaawac soo gaari doono, taas oo keeni doonta in la laalo hawlaha qaar shaqaalahana la dhimo. Dowladda hoose way u diyaarsan tahay in ay sii waddo hawlaha adeegbixineed ee lagamamaarmaanka u ah magaalada iyadoo khatarta dillaaca cudurku jirto, sida dhulka, caafimaadka iyo xalalka waara.

Intaa waxa dheer in loo baahan yahay xirmo miisaaniyadeed oo lagu baritaaro ganacsiyada yaryar iyo kuwo meeldhexaadka ah (SMEs) si looga hortago in ay kacaan, taasina waxay gacan ka geysanayaa in la xaqiijiyo in qoysasku (siiba kuwa saboolka ahi) ay dakhli helaan. Khataraha dhaqaale ee ku lammaan Fayraska Koroona waa badan yihiin. Cawaaqibta ka dhalanaysa kala-durkidda iyo in muwaaddiniinta si ballaaran loogu baaqo in ay guryahooda joogaan ee dhaqaalaha taabanaysaa aad bay u weyn tahay. Cawaaqibta dhaqaale ee noocaas ahina aad bay u xooggan tahay waxaana laga dareemayaa dhanka alaab-keenista iyo dalabkaba. Durba waxa soo ifbaxday saamayn taban oo dhaqaale oo Soomaaliya ku dhacaysa, ugu yaraan nuska hore ee sannadkan iyo muddo ka sii badanba haddii halbeegyada xakamayntu weli sii jiraan. Marka la eego saamaynta dhaqaale ee iminka, kororka Dakhliga Guud ee 2020 waxa la filayaa in uu hoos u soo dhaco 5.3%, Dakhliga Guud ee caadiga ah ee 2020 isna in uu 11% hoos u dhaco. Intaa waxa raacda in dowladda dhexe qiyaasayso in soodejintu hoos u dhacdo 20%, dhoofintu ay hoos u dhacayso 35% oo ay badanka ugu wacan tahay maaddaama dhoofintii xilliga Xajka ee sannadkan la joojiyay. Cashuuraha iibku waxay sidoo kale 40% hoos ugu dhacayaan alaabaha la soo dejiyo oo ay ugu

wacan tahay qiimaha sarreeya ee walxaha cashuurta iibka. Guud ahaan, waxa tan ka dhalanaya 30% dakhli lun ah.

Muqdisho waxa u gaar ah in Koroonuhu wiiqayo dhaqaalaha, waayaha bulsheed iyo adeegdaya qaybahan soo socda:

1. **Noolaanshiyaha iyo gunnada:** dadku waxay eersan doonaan xakamaynaha iyo hoosudhaca dakhligooda
2. **Ganacsiyadaha maxalliga ah:** ganacsiyada yaryari way khasaari doonaan, waxaana ugu wacnaanaysa bandawga suuragalka ah ee dowladdu soo rogi karto oo sababi doonta koror ku yimaadda heerka shaqala'aanta.
3. **Gaadiidka iyo isusocodka:** Fayraska dartii, bandawgu waxa uu saamaynayaa gaadiidka dadweynaha oo il dakhli oo muhiim ah u ah qoysas badan, gaar ahaan dhallinyarada Muqdisho ee bajaajtu u tahay ishooda shaqo.
4. **Adeegyada dowladda hoose:** haddii dakhliga dowladda hoose ee Muqdisho u yaraado sida loo badinayo, adeegyo dowladda hoose bixin jirtay oo gaar ah ayay adkaanaysaa in lagu sii wado tas'hiilaadka ay ka midka yihiin nadaafadda, korontada iyo dhisidda kaabayaasha.